

**Xeer 18 Maajo 1956, lamba. 80**

**Awoodda Maamul ee la siiyaya Guddoomiyaha Maxkamadda Garsoorka.**

### **MAAMULAHA**

Marka uu tixgaliyay habboonaanta in la siiyo madax bannnani ballaaraan awoodda garsoorka Dalka;

Marka u garawsaday in la siiyo Guddoomiyha Maxkamadda Garsoorka awood leh dabeeecad maamul ee la xariirta shaqaalaha iyo habasmi u socodka Xaafiisyada Garsoorka;

Marka uu dhagaystay Guddiga Maamulka;

Marka uu arkay Amarka taariikhda 2 Febbrayo 1956 lr. 5 ee lagu meelmariyay Xeerka Nidaamka Garsoorka Soomaalya;

Isgoo qaddarinaya awoodda uu siinayo Xeerarka Jamhuuriyadda Talyaaniga ee 4 Nofember 1951, lr.1301 ee lagu ansixiyay laguana fuliyay Heshiiska Ilalinta Dhulka Soomaaliya iyo xeerakii ka dambeeyay;

### **WUXUU XEER KU SOO SAARAYAA**

#### **Qod. 1**

Guddoomiyaha Maxkamadda Garsoorka wuxxu qabanayaa hawlaha soo socda:

- maamulka shaqaalaha garsoorka;
- arrimaha la xarira habsami u socodka maamulka hay'adaha garsoorka;
- ka hawlgalo waraaqaha sharchiyeed ee Xeerka Nidaamka Garsoorku u xilsaaro ee la xarira iqtisaaska mamulka;
- daraasadka iyo mashaariicda la xariirta xerka Nidaamka Garsoorka;
- anshax-marinta qarenada;
- notaayooyinka.

#### **Qod. 2**

Xeerkaanu wuxuu dhaangalayaa taariikhda lagu baahiyoo faafinta Rasmiga.

Muqdisho, 18 Maajo 1956.

**Maamulaha  
Anzilotti**

Waan arkay iyo la diiwaangaliya lamba. 306, 28 Maajo 1956

**Agaasimaha Xisaabiyaha Guud: Tura**

Lagu sugay lana diiwangeliya. Diiwaanka lamba. 16, bogga 114

Muqdisho, 28 Maajo 1956.

**Hantidhowraha Guud: Spadaro**